


Nin oday ah marku ninkaaga yahay

Un uomo anziano per marito



Aranya

☑ Sunniva Høiby-Øiset

📄 Mohamed Abdirashid

|| 5

🗨 Soomaali / Italiano



LIDA Stories

lidastories.net

**Nin oday ah marku ninkaaga
yahay / Un uomo anziano per**

marito

Aranya

☑ Sunniva Høiby-Øiset

📄 Mohamed Abdirashid (so), Andrea

Ciasca Marra (it)




This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International license.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0)
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



Waxaan u maleeynaye in ragga Norwiiijiga ay yihiin ragga ugu fiican adduunka, balse taasi run maaha! Kahor intaan la kulmin ninka noqday ninkayga, waxaan ka shaqeeynaye Warshad ku taal Bangkok, wuxuu ku noolaa Pattaya. Waxaan ku kulanay internetka oo aan ugu dambeyntii noqonnay lamaane.

...


Io pensavo che gli uomini norvegesi fossero i migliori del mondo, ma non è vero! Prima di incontrare l'uomo che sarebbe diventato mio marito, io lavoravo in fabbrica a Bangkok, e lui viveva a Pattaya. Ci siamo conosciuti su internet e infine ci siamo messi insieme.



Muddo ka dib waxa aanu go'aansanay in aanu is guursano. Waxaan ka soo jeedaa qoys sabool ah, markaa in aan haysto nin ajnabi ah oo daryeeli kara qoyskayga waxay qayb ka ahayd sababta aan u guursaday.

...

Dopo un po' abbiamo deciso di sposarci. Io provenigo da una famiglia povera, e avere un marito straniero che si prendesse cura della mia famiglia è stata una delle ragioni per cui l'ho sposato.



Waxaan u soo guurnay Norway, waxaanan bilaabay in aan aado iskool si aan u barto Norwejiga. Waxay ahayd waqti adag. Maan haysan shatiga darawalnimada, ninkaygu waxa uu ku qasbanaaday in uu ii kaxeeyo iskoolka, isugo, dibna isoo celiyo. Waxay ahayd meel saacad noo jirta. Muddo ka dib waanu isku soo dhawaanay, laakiin wuxuu weli ku adkaystay inuu iskoolka ii wado. Ma uu rabin in aan keligay socdo.

...

Ci siamo trasferiti in Norvegia e io ho iniziato a andare a scuola per imparare il norvegese. È stata davvero dura. Non avevo la patente, così mio marito doveva portarmi a scuola in macchina, aspettare che io finissi e poi riportarmi a casa. La scuola era a un'ora di macchina da casa. Dopo un po' ci siamo trasferiti più vicino, ma lui comunque insisteva per portarmi in macchina alla scuola. Non voleva che ci andassi a piedi da sola.

Ma garanayo waxa mustaqbalka noqon doono.
Qorshahaygu waa inaan iskool kale aado, laakiin
ninkaygu ma rabo inaan taas sameeyo. Waxa uu
qorshaynayaa inuu iga sii fogaaayo si uu iigu
adkeeyo. Waxaan rabaa inaan iska celiyo, laakiin
ma garanayo sida. Ma fududa in dal shisheeye
kula noolaado nin oday ah sidii ninkayga oo kale
sida aan moodayay inay noqon doonto.

...

Non so cosa accadrà in futuro. Io progetto di

frequentare un'altra scuola ma mio marito non
vuole. Pensa di trasferirsi ancora più lontano per
rendermi le cose più difficili. Vorrei resistere, ma
non so come. Non è facile come pensavo vivere
in un paese straniero con un vecchio per marito.

Wax lacag ah ma helin tan iyo markii aan
Norway imid. Mar ninkaygu wuxuu i siiyay lacag
aan ku qadeeyo, laakiin maadaama aan haysto
lacag aad u yar, waan xafiday. Saaxiibadayda
iskoolka waxay rabaan inay i caawiyaan si aan
shaqo u helo, laakiin ninkayga wuxuu leeyahay
ma awoodi karo. Uma maleynayo aan ka
shaqada nadiifinta aysan igu habbooneen aniga.

...


Da quando sono venuta in Norvegia raramente
ho soldi. Una volta mio marito mi ha dato del
denaro per il pranzo, ma io l'ho messo da parte,
dal momento che ne avevo così poco. I miei
amici a scuola vogliono aiutarmi a trovare
lavoro, ma mio marito dice che non posso.
Pensa che lavorare come donna delle pulizie
non sia appropriato per me.



Taa beddelkeeda shaqo kale ayuu ii qabtay – oo ah dhisitaanka geerashka. Waxa uu ahaa masuulka anigana wax walbana waan sameenayey. Wax badan ma uu qaban karin sababtoo ah wuu xanuunsanaa. Lacagtii uu ku dhisay geerashka waxba igamuusan siin.

...

Lui invece aveva un altro lavoro per me: costruire un garage. Lui dirigeva i lavori e io facevo tutto quello che diceva. Non poteva far molto perché non stava bene. Non mi ha mai dato un soldo di quelli che ha ricavato dal garage.



Maalin ayuu yiri waan ku caajisaa markuu guriga keligiis joogo, markaas ayuu go'aansaday inaan ey keensano. Ma rabin eey maadaama aan daalanahay iskoolkaa ka dib, waxaanan lahaa casharo la iga rabo inaan kaga shaqeeyo guriga. Waxa uu sheegay in uu socodsiin doono eeyga maalin kasta, laakiin ugu dambeyntii waa in aan daryeelo labadaba eeyga iyo ninkeyga odayga ah.

...

Un giorno mi ha detto che si annoiava a stare da solo a casa, così ha deciso di prendersi un cane. Io non volevo un cane perché dopo la scuola ero stanca e avevo dei compiti da fare. Lui diceva che avrebbe portato a spasso il cane ogni giorno, ma alla fine ho dovuto occuparmi io sia del mio anziano marito che del cane.